Växjö kommun
*Europas grönaste stad*

# Warbixin ku saabsan qofka ma'uuliyada loo dhiibo (god man)

**Qofkee la siinyaa qof mas'uuliy ah (god man)?**
Haddii ay jirto sabab laguugu qabankaro qof mas'uul ah maadaama aad jiran tahay, dhican maxkada wax ka qabto, xaaladaada caafimaad ay xuntahay iyo wixii la mid ah oo aanad dhaqaalahaaga maamulakarin ama wixii danahaaga ah. Marka waxaad codsankartaa in laguu qabto qof mas'uul arrimahaaga ka ah (god man).

Qofka mas'uulka ah waxa laguu qabanayaa haddii aad u baahan tahay oo keliya. Qofka ams'uul kaa ah (god man) laguuma qabanayo haddii aad caawimo habkale ku helikartid. Tusaale haddii qof aad saaxiibtihiin ama qof qaraabadaada ah uu wakiil kaayahay oo aad awoodii siisay (fullmakt).

**Muxuu yahay qofka mas'uulka ahi?**
Qofka mas'uulka ahi (god man) waa nin ama qof dumar ah qofkaas oo kaa caawinaya adiga dhaqaalahaaga, kuu nidaamiyo waraaqaha kuu yimaada iyo waraaqaha kale kaana caawinaya wixii aad u baahan tahay. Xitaa haddii aad leedahay qof mas'uula (god man) adiga ayaa go'aaminaya wixii adiga kugu saabsan adigoo la kaashanaya qofka mas'uulka ah.

**Muxuu qabtaa qofka mas'uulka ahi?**
Waxaad adigu kaa caawinayaa dhinaca dhaqaalaha, inuu biilasha kaa bixiyo, kharashyada, lacag kuu dhigo, wixii daymo ahna kaa eego iyo wixii la mid ah.

Wuxuu kaloo qofka mas'uulka ahi (gode mannen) adiga kaa caawinayaa inuu dakhliga ku soo galay kuu caddeeyo (deklarera), inuu tusaale ahaan kuu dalbo kaalmada kirada guriga (bostadsbidrag) oo uu kaa caawiyo xiriirada tusaale ahaan dhinaca bankiga iyo u adeegidda dadka gaboobay (hemtjänsten).

Qofka mas'uulka ahi inta badan wuu kula kulmayaa si uu isagu/iyadu ay u oggaadaan inay xaalada gurigaagu fiican tahay noloshuna sidii loogu talagalay kuugu socoto.

Qofka adiga mas'uulka kaa ah (gode man) bishii halmar ayaad la kulmaysaa. Kadibna waxaad kaloo ku heshiinaysaa sida aad xiriirka isula samaynaysaan hadaynoqoto telefoon, sms ama iimay.

**Qofkee ayaa mas'uul noqokara (god man)?**
qofkasta oo daacad ah, taxaddir leh oo aad u foojigan, qofkaas oo jecel inuu dadka kale caawiyaan arji ayuu u soo qorankaraa inuu noqonayo qof mas'uul ah (god man).

Qofka mas'uulka noqonayaa (gode mannen) da'da uu doono ayuu noqokaraa, shaqadii la doonana wuu ka shaqankaraa ama wuxuu noqonkaraa qof hawlgaba (pensionär).

Guddida sare ee maamulka dadka mas'uuliyada (Överförmyndarnämnden) loo dhiibo waxay kaantaroolaan qofka mas'uuliyada loo dhiibo (gode mannen) in qofka ay mas'uuliyada u dhiibayaan uu yahay qof dhaqaalihiisa ka adag oo aanu qofkaasi isag/iyadu aanu wax dembiya gelin. Kuligoodna waxa laga soo kaantaroolayaa Booliska, Hay'adda dawlada ee qaabilsan in qofka dayn lagu leeyahay (Kronofogden) iyo adeega arrimaha bulshada (socialtjänsten).

**Sidee ayaa qofka loogu qabankaraa qof mas'uula?**
Adiga ayaa qofka mas'uulka ah (god man) codsanaya. Waxaad caawimo ka helaysaa markaa codsiga samaynaysid qof araabadaada ah, qof ka socday adeega bulshada ama qof ka socda qaybta daryeel. Arjiga waxa loo dirayaa maxkmada degmad Växjö, taas oo go'aan ka gaaraysa haddii aad xaq u leedahay in laguu qabto qof ma'uula (god man).

**Maxaa dhacaya markaad codsiga samayso?**
Haddii aanad adigu haynin qof aad leedahay qofkaas ayaan rabaa inuu mas'uul iga noqdo (god man), markaa Guddida sare ee maamusha dadka mas'uuliyiinta ah (Överförmyndarnämnden) ayaa qof kuu soo bandhigaysa oo ra'yi kuu soo jeedindoonta. Wakhti ayaad ballansanaysaa si laguula kulmo waxaanad markaa sheegaysaa waxa aad u baahan tahay in lagaa caawiyo waxay yihiin. Haddii aad rabto waxaad qoraysaa warqad waxaanad halkaas ku ansaxinaysaa qofka mas'uulka kaa noqonaya (gode mannen).

Kadibna maxkamada degamda Växjö ayaa go'aan ka gaaraysa in laguu qabto qof mas'uul ah.

Marka arrintu dhammaato ayaa adiga iyo qofka mas'uulka ahba ay maxkamadu u soo diraysaa warqad. Waa markaa marka laguu sameeyey qof mas'uul ah. Kadib waxa kula kulmaya qofka mas'uulka adiga lagaaga dhigay waxaana markaa siwadajira u qorshaynaysaa sidii aad u wada shaqan lahaydeen.

**Ma kharash ayaa la bixinayaa qofka mas'uulka ah?**
Haa, iyadoo ay ku xiran tahay dhaqaalaha ku soo galaa inta uu leegyahay, ama haddii ay lacag badani kuu taalo bangia adiga ayaa iska bixinaya. Haddii kale degmadaada ayaa lacagta qofka mas'uulka ah siinaysa (gode mannen).

**Maxay qabataa Guddida sare ee maamulka mas'uuliyiintu (Överförmyndarnämnden)?**
Degmo kastaa waxay leedahay Guddi sare oo ka mas'uula (Överförmyndarnämnden) dadka mas'uuliyada loo dhiibayo. Guddida sare ee mas'uuliyiintu (Överförmyndarnämnden) ma aha qofka mas'uuliyada loo dhiibayo (gode mannen) sheefkiisa, mana aha kuwa u sheegaya waxa uu qofkaasi qabanayo. Laakiin guddida sare ee maamulka mas'uuliyiintu waxay kaantaroolaan inuu qofka mas'uuliyada loo dhiibay uu hawshii loo diray ka soo baxay oo sidii loogu talagalay uu u qabtay. Haddii aad adigu wax dacwo ah ka qabto qofka kaa mas'uulka ah (gode mannen) waxaad u dacwoonaysaa Gudddida sare ee maamulka (Överförmyndarnämnden) mas'uuliyiinta.

Marmar waa inuu qofka mas'uuliyada loo dhiibaa (gode mannen) uu weydiiyo Guddida sare ee maamulka (Överförmyndarnämnden) oggolaansho, tusaale haddii lacag aad u badan laga soo saarayo bangiga koontadaada.

Sannadkii halmar ayuu qofka kaa mas'uulka ahi isaga/iyadu ay soo bandhigayaan sidii uu lacagtaada u maamulay. Guddida sare ee maamulku (Överförmyndarnämnden) waxay kaantaroolayaan sidii uu qofka mas'uulka ahi wax u soo bandhigay si adiga laguugu xaqiijiyo inay wax waliba si sax ah u baxeen.

**Imisa ayaa qofka mas'uulka ah la haysankaraa (god man)?**
Qofka kaa mas'uulka ah (god man) waad haysankartaa ilaa iyo inta aad u baahan tahay. Haddii aanad u baahnayn qofka kaa mas'uulka ah waxaad u sheegaysaa isaga ama waxaad la hadlaysaa Guddida sare ee maamulka (Överförmyndarnämnden). Guddida sare ee maamulka waxaad u soo qoraysaa warqad adigoo ugu sheegaya in aanad u baahanayn qof kaa mas'uula wixii hadda ka danbeeya. Marmar waxa dhicikarta in loo baahan yahay in la bedelo qofka

mas’uulka ah (god man). Markaas Guddida sare ee maamulku (Överförmyndarnämnden) waxay u baahan tahay inaad warqad adigu u soo qorto sababta aad u rabto inaad u bedelesho qofka kaa mas’uulka ah (god man).